

**DALBO CUSBOONAYSIIINTA GUNOYINKA FOODSHARE
REQUEST FOR REPLACEMENT FOODSHARE BENEFITS**

TILMAAMAHA: Haddii aad hadda xubin katahay FoodShare cuntadii aad ku iibsaday gunooyinka FoodShare ee khasaartay sabab laxariirta nasiib daro ama masiibo dabiici ah oo gurigaagii kuhabsatay, foomkaan buuxi oo gudbi, adoo soo raacinaaya cadaaynta* ah in cuntadaadii khasaartay, adoo adeegsanaaya mid kamid ah dookhyada soosocda:

Xasusnoow: Foomka aad buuxisay iyo cadaaynta waa inaad soo gudbisaa muddo 10 maamood ah gudahood laga bilaabo marka cuntadu kaa khasaartay.

 **Oonleen ahaan**

Dhamaan bogaga ku iskaan garee webseetka ACCESS. Waxaad sidaan kusameyn kartaa adoo adeegsanaaya ciwaanka webseetka ACCESS kaasoo aad kagali karto barta access.wi.gov.

 **Boostada**

Haddii aad kunooshahay degmada Milwaukee County, boosto ugudir foomka:
MDPU
PO Box 05676
Milwaukee, WI 53205

Haddii aadan ku noolayn degmada Milwaukee County, boostada ugudir foomka:
CDPU
PO Box 5234
Janesville, WI 53547

 **Fakiska**

- Haddii aad kunooshahay degmada Milwaukee County, fakiska ugudir foomka 888-409-1979.
- Haddii aadan ku noolayn degmada Milwaukee County, fakis ugudir foomka 855-293-1822.

 **Si toos ah**

Ugee foomka wakaaladaada. Macluumaadka aad kala xariirayso wakaaladaada waxaad kahelaysaa webseetka Wisconsin Department of Health Services (DHS, Waaxda Adeegyada Caafimaadka ee Wisconsin) oo ah www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/imagery/index.htm

Magaca – Xubinta (Kan ugu Danbeeya, Kan koobaad, Magaca Aabaha)

Lambarka Kiiska

Qeex sida cuntadaadii ay kuburburtay (tusaale ahaan, sida inuu daad qaaday, korontada oo go'day, dab kacay):

Qiyaasta
Qiimaha Cuntada
Khasaartay
\$

Taariikhda Cuntadu Khasaartay (tani way kaduwanaan kartaa taariikhda nasiib darada ama masiibada dabiiciga ah ay kudhacday guriga taasoo burburisay cuntada. Tusaale ahaan, hadii korontadu kaatagto, cuntada waxay ubadan tahay inay khasaartay ama quruntay maalinta xigta. Dab ama daad ayaa khasaarin kara cuntada isla maalintaas.)

Waan fahmayaa su'aalaha iyo bayaanada kuqoran foomkaan. Waan fahmayaa ganaaxyada kadhalaan kara bixinta macluumaad been ah ama jabinta xeerarka. Waxaan xaqiijinayaa, ayadoo ay jiraan ganaax ka imaan kara beenta iyo dhaarta beenta ah, in dhamaan jawaabahayga, ay yihiin kuwo sax ah oo dhamaystiran ilaa intaan ogahay. Waan fahmayaa waana ogalahay inaan baxsho dukumiintiyada si ay u cadeeyaan waxaan sheegay. Waan fahmayaa in wakaalada maxaliga ah ay laxariiri karaan dad kale ama ururo si ay uga helaan cadaaynta muhiimka u ah uqalmidayda iyo heerka gunooyinka.

SAXIIXA – Codsade

Xiliga Lasxiixay

*Foomamka loo qaadan karo inay noqdaan cadaayn waxaa kamid ah macluumaadka ay bixiso waaxda dab damiska, booliiska, urur bulsho, ama ilaha kale ee caawimaada baxsha. Cadaaynta cuntada khasaartay **waxaa suuragal ah** inaan loobaahan marka xaalad degdeg ah lagu dhawaaqo.

Dhagaysi Cadaalad ah: Waxaan fahmayaa inaan xaq uleeyahay inaan codsado dhagaysi cadaalad ah si aan racfaan uga qaato talaabo kasta oo laqaaday kuna aadan codsigayga ama gunooyinka joogtada ah hadii aanan aqbalin falkaas. Waxaan fahmayaa inaan codsan karo dhagaysi cadaalad ah anoo qoraal ahaan ugu dirayaa: **Department of Administration, Division of Hearings and Appeals (Waaxda Maamulka, Qaybta Dhagaysiyada dacwada iyo Racfaanada), PO Box 7875, Madison, WI 53708-7875 ama wacaaya 608-266-7709.** Waxaan sidoo kale laxariiri karaa xafiska wakaalada aan codsiga ugudbiyay waxaana kadalban karaa dhagaysi cadaalad ah si hadal ah ama qoraal ahaan. Waan fahmayaa inaan ka akhriin karo buug gacmeedka Diiwaangalinta iyo Gunooyinka ee ForwardHealth (P-00079) si aan faahfaahin dheeri ah uhelo.

Warbixinta Takoor La'aanta

Si waafaqsan sharciga xuquuqda madaniga ah ee federaalka iyo Maraykanka. Waaxda Beeraha (USDA) shuruucda xuquuqda madaniga ah iyo xeerarka, USDA, Wakaaladaheeda, xafiisyada, iyo shaqaalaha, iyo hay'adaha ka qayb galaya ama maamulaya barnaamijyada USDA waxaa laga mamnuucay ku takoorida ku salaysan isirka. midabka, asalka wadaka, galmada, caqiidada diinta, naafanimada, da'da, rumaynta siyaasadeed, ka aarsiga ama aargoosiga hawl xuquuq madani oo hore barnaamij kasta ama hawl ay qabatay ama maalgelisay USDA.

Dadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh oo macluumaadka barnaamijka ah (tusaale, Farta qoraalka indhoolaha, daabacaad wayn, cajal maqal ah, Luqadda Dhegoolaha ee Maraykanka, iwm), waa inuu la soo xidhaadhaa Wakaalada (Gobol ama degmo) halka ay ka soo codsadeen dheefaha. Dadka dhegoolaha ah, maqalku ku adagyahay ama leh nafo hadalka ah waxay kala soo xidhiidhi karaan USDA Is gaadhsiinta Federaalka ee Dadka Nafada ah lambarkan (800) 877-8339. Intaa waxa dheer, macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luqaddo kale.

Si loo gubiyo cabashada takoor la'aanta, buuxi foomka Cabashada Takoorka ee Barnaamijka USDA, (AD-3027) oo onlayn lagaga helo: [How to File a Complaint](#), iyo xafiis kasta oo USDA ah, ama qor warqad ku socota USDA oo warqadda ku bixi dhammaan macluumaadka lagu codsaday foomka. si aad u codsato nuqul foomka cabashada ah, soo wac **(866) 632-9992**. U soo gudbi foomkaaga la buuxiyay ama warqadda USDA addoo adeegsanaya:

- (1) boosta: Maraykanka. Waaxda beeraha
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410;
- (2) fax: (202) 690-7442; or
- (3) iimaylka: program.intake@usda.gov

Hay'dani waa adeeg bixiyaha fursadda loo simanyahay